



Bildungs- und Kulturdirektion
Amt für Kindergarten, Volksschule und Beratung
(Waaxda Waxbarashada iyo Dhaqanka
Xafiiska Dugsiga barbaarinta, Dugsiga Hoose iyo La talinta)

Sulgeneckstrasse 70
3005 Bern
+41 31 633 84 51
akvb.bkd@be.ch
www.bkd.be.ch

Bildungs- und Kulturdirektion, Sulgeneckstrasse 70, 3005 Bern

Ku socoto waaladiinta carruurta dhalinyarada leh taageerada
la balaariyay (eU)

Tixraaceena: 2023.BKD.1231 / 1477762

Bern, 22. Abriil 2024

Isbadelada taageerada la balaariyay (eU) ee dugsiyada caadiga ah

Waaladiinta Qaaliga ah

Laga Bilaabo Agoosto 2024, Waaxda Waxbarashada iyo Dhaqanka Kanton of Bern (BKD) waxay go'aansatay inay isbedelo ku sameyso taageerada la balaariyay (eU) ee dhammaan dugsiyada gaarka ah. Dhaqanka hadda jira waa lala qabsanayaa si carruur badan ay uga faa'idaan, dugsiyada ay u howlgelin karaan illaha si dabacsanaan badan oo waafaqsan baahida. Waxaa sidoo kale jiri karo isbadelo canugaaga ah.

Gabadhaada/wiilkaaga ayaa hadda ku helo taageero dheeraad ah fasalka. Dugsiga wuxuu kaala hadlayaa haddii eU la sii wadayo. Maamulka dugsiga ayaa laga yaabaa inuu horay kuu soo ogeysiiyay in canugaaga la taageerayo wixii ka dambeeyo sannad dugsiyeedka 2023/2024. Xaaladaan oo kale, wax walba waxay ahaanayaan isku mid.

eU way sii wadeysaa inay wax ka qabato baahiyaha taageerada canugaaga. Intaas waxaa dheer, dugsiga ayaa sidoo kale si fiican ugu suurtoogaleyso inuu la macaamilo xaaladaha caqabadaha ee fasalka oo mustaqbalka. Casharada taageerada la balaariyay ayaa sidoo kale hadda waxay u isticmaali karaan maamulka dugsiga xaaladaha adag ee fasalka dhexdiisa ah. Tan ayaa ka dhigan in taageerada casharka eU loogu bixin karo shaqsi ahaan, koox ahaan ama fasalkoo dhan.

Ma jiraan cadeyn xarunta la talinta waxbarashada (EB) oo muhiim u ah casharada taageerada la balaariyay. Maamulka dugsiga ayaa ansixiyo taageeradaan.

Haddii taageerada la balaariyay ee loogu tallogalay canugaaga la balaarinayo afar simistar ka-dib, dugsiga ayaa midaan kaala hadlayo adiga. Laga bilaabo hadda, waxaa kaliya oo ay muhiim u noqoneysaa diiwaangelinta canugaaga xarunta la talinta waxbarashada haddii isbadel weyn oo baahiyaha taageerada laga shakiyo.

Haddii aad qabtid wax su'aalo guud oo ku saabsan taageerada la balaariyay, fadlan la soo xiriir shaqaalaha masuulka ka ah ee BKD, Marwo Sabine Lütolf, sabine.luetolf@be.ch ama taleefonka 031 636 84 72.

Haddii aad qabtid wax su'aalo gaar ah ee ku saabsan canugaaga, fadlan si toos ah ula soo xiriir maamulka dugsiga masuulka ka ah. Waxay ku soo ogeysiinayaan wax ku saabsan isticmaalka la qorsheeyay ee casharada taageerada la balaariyay.

Muhiim ayay u tahay BKD iyo dugsiga in canugaaga helo dhiirogelinta iyo taageerada ugu macluulsan.

Aad ayaad ugu mahadsantahay la shaqeyntaada wanaagsan ee joogtada ah ee dugsiga oo danna canugaaga ah.

Salaan gaar ah

Xafiiska Dugsiga barbaarinta, Dugsiga Hoose
iyo La talinta

A handwritten signature in blue ink, consisting of a large, stylized loop followed by a horizontal stroke and a vertical stroke that crosses the loop.

Erwin Sommer
Agaasimaha